## Caawimaad Sharci

**Mashruucyada Cadaalada Galbeedka Waqooyi Waxbarashada Sharciyeed ee La isku duway, Mashruuc Tallo iyo Wareejin (CLEAR)**

**888-201-1014**
**www.nwjustice.org**

## Waaxda Dammaanada Shaqaalaynta

**800-318-6022**
**www.esd.wa.gov**

## Looxada Ururka Gobolka Washington

Si aad u heshid adeego wareejin sharciyeed ka jira degmadaada wac:

**800-945-9722**
**www.wsba.org**

## Boggaga internetka

**Gelida Washington:** Macluumaadka Dowlada Waddanka iyo Adeegaha

**www.access.wa.gov**

## Foomamka maxkamada, barnaamijyada fududeeyaha dhismaha maxkamada, meelaha ay maxkamadu ku taalo iyo macluumaad kale oo muhiim ah

**www.courts.wa.gov/**

**Qaybta Taakulaynta Ilmaha:**

**www.childsupportonline.wa.gov**

## Ii-maylka

**DCS-CRU@dshs.wa.gov**

Wac xafiiska Qaybta Taakulaynta Ilmaha kuugu dhow ama 800-442-KIDS (5437) si aad u oggaatid xafiiska gacanta ku haya kiiskaaga.

Xafiisyada Qaybta Taakulaynta Ilmaha

| | |
|---|---|
| Everett | 800-729-7580<br>425-438-4800 |
| Kennewick | 800-345-9981<br>509-374-2000 |
| Olympia | 800-345-9964<br>360-664-6900 |
| Seattle | 800-526-8658<br>206-341-7000 |
| Spokane | 800-345-9982<br>509-363-5000 |
| Tacoma | 800-345-9976<br>253-597-3700 |
| Vancouver | 800-345-9984<br>360-696-6100 |
| Wenatchee | 800-535-1113<br>509-886-6800 |
| Yakima | 800-441-0859<br>509-249-6000 |
| Xarumaha saldhiga ah | 800-457-6202<br>360-664-5000 |

Barnaamijka Taakulaynta Ilmaha Gobolka Washington



# Anigu ma haysto shaqo, maxaa ku dhacaya taakulaynta ilmahayga?

Washington State Department of Social & Health Services

*Transforming lives*

### Maxaa ku dhacay taakulaynta ilmahayga hadda maadaama aan haysanin shaqo?

Adigu waa laguugu leeyahay taakulayn ilmo xitaa haddii aadan haysanin shaqo. Amarkaaga taakulaynta ilmaha ayaa dejinaya ama qoraya tirada lacag bixinta ay khasab tahay in ay aruuriso Qaybta Taakulaynta Ilmaha (DCS). Qaybta Taakulaynta Ilmaha ma joojinayo qaadashada tallaabooyinka lacag aruurinta marka aadan kasbanaynin mushaar.

### Ma tahay Qaybta Taakulaynta Ilmaha mid qaadanaysa dheefahayga shaqo la'aanta?

Haa, Qaybta Taakulaynta Ilmaha waxay ka qaadanaysaa lacag bixinada dheefaha shaqo la'aanta.

Haddii aad u bixisid taakulaynta ilmaha dhinaca Diiwaanka Taakulaynta Gobolka Washington (WSSR), Qaybta Taakulaynta Ilmaha waxay xajin kartaa illaa boqolkiiba 50 (nuska) dheefahaaga. Haddii aan ku filnayn nuska dheefahaaga si loogu bixiyo taakulaynta hadda ah, waxaad si toos ah ugu bixin kartaa inta harsan dhinaca Diiwaanka Taakulaynta Gobolka Washington. Qaybta Taakulaynta Ilmaha waxay ku daraysaa lacag kasta oo taakulaynta hadda ah ee aan la bixinin tirada deynta hore ee adiga laguugu lahaa.

### Waxaa la igu leeyahay taakulayn baddan oo dib u dhac ah, waxaana u baahanahay in la yareeyo tirada lacag bixintayda.

Waxaad kala hadli kartaa Shaqaalahaaga Fullinta Taakulaynta (SEO) wixii ku saabsan yaraynta deynta hore ee lacag bixinta taakulaynta ah. Shaqaalaha Fullinta Taakulaynta ma bedeli karo tirada lacagta taakulaynta hadda ah ee ku qoran amarkaaga.

Waxaad codsan kartaa Guddiga Shirka. Guddiga Shirka waa muraajaco aan rasmi ahayn oo lagu sameeyo kiiskaaga iyo xaaladaada midaas oo uu sameeyo Madaxa Guddiga Shirka (qareenka Qaybta Taakulaynta Ilmaha). Madaxa Guddiga Shirka wuxuu go'aansanayaa haddii kulan teleefoon ama xafiiska ah la qaban doono iyo haddii kale iyo haddii shaqaale dheeraad ah oo u shaqeeya Qaybta Taakulaynta Ilmaha ay joogi doonaan kulanka iyo haddii aan joogi doonin si ay dad ugu caawiyaan go'aansashada tallaabada ay qaadan doonto Qaybta Taakulaynta Ilmaha si looga jawaabo codsigaaga. Madaxa Guddiga Shirka wuxuu soo saarayaa go'aan qoran oo ku saabsan gargaarka aad codsatay.

Guddiga Shirka ayaa ku siin kara gargaar ka ahaada tallaabada aruurinta, ama ka ahaada deynta taakulaynta saraysa ee kugu leeyahay gobolka. Wixii ku saabsan macluumaad dheeraad ah oo khuseeya Guddiyada Shirka, la xiriir SEO-gaaga kana codso buuggyaraheena lagu magacaabo, "Guddiyada Shirka Taakulaynta Ilmaha?" (DSHS 22-386).

### Maxaan sameynayaa haddii dheefahayga shaqo la'aanta ay isbedelaan ama aan dib ugu noqdo shaqada?

U wac SEO-gaaga sida ugu dhakhsiyaha baddan ee aad u oggaatid in uu dakhligaagu isbedelayo. Haddii aadan la xiriirin SEO-gaaga, Qaybta Taakulaynta Ilmaha waxay u diri kartaa jeeg mushaar lacag jarid ah dhinaca qofka aad u shaqaysid ee cusub midkaas oo gaaraya illaa boqolkiiba 50 oo ah lacagta aad guriga u isticmaashid.

### Dakhligayga aan ka helo shaqada cusub waa mid yar. Sideen ku heli karaa amarka bedelaada taakulaynta ilmahayga?

Weydiiso buuggyaraha Qaybta Taakulaynta Ilmaha 22-652, "Muraajacada iyo Haggaajinta Amarka Bedelida Taakulaynta Ilmaha."

## Goormee dejinayaa ama qorayaa amarka maxkamada taakulaynta ilmaha

Haddii uu amarkaagu yahay mid ah ugu yaraan muddo hal sanno ah waxaad ka codsan kartaa maxkamada in ay bedesho (dib u habbeyn) ku samayso tirada ku qoran amarkaaga haddii ay noloshaadu isku bedeshay qaab halis ah ama aan la filanaynin ama haddii uu amarku kuu sababayo xaalad dhaqaale aad u adag.

Haddii uu amarkaagu yahay mid ah ugu yaraan muddo labbo sanno ah waxaad ka codsan kartaa maxkamada in ay bedesho (dib u habbeyn) ugu samayso tirada ku qoran amarkaaga maadaama uu isbedelay dakhligaaga.

Haddii aad qabtay isbedel weyn oo ku dhacday duruufahaaga, weydii SEO-gaaga muraajaco dib u bedelid ah. Adiga iyo waalidka kale waxaa la idin ka codsan karaa in aad buuxisaan foomamka muraajacada oona xaqiijisaan dakhliyadiina.

Haddii ay xaaladaadu ama kiiskaasu u muuqdo in uu kasoo baxayo ama buuxinayo shuruudaha loogu talogalay dib u bedelida, Qaybta Taakulaynta Ilmaha waxay u wareejin doontaa kiiskaaga qareen maxkamad oogis ah. Qareenka maxkamad oogista ah wuxuu dooranayaa haddii kiiska loo dirayo maxkamada ama haddii aan loo diraynin.

Haddii aan kiiskaagu kasoo bixin ama buuxinin shuruudaha loogu talogalay hawsha bedelaada Qaybta Taakulaynta Ilmaha waxaad awoodaa in aad:

- qabsatid qareen, ama
- aadid maxkamada adiga naftaada ((kaligaaga) ayada oo uu kugu caawinayo fududeeyaha sharciga maxkamada qoyska. Weydiiso buuggyaraha Qaybta Taakulaynta Ilmaha "Sidee Loogu Helaa ama Loogu Bedelaa Amarka Taakulaynta Ilmaha Adiga Kaligaaga".

Fududeeyaha maxkamadu wuxuu waalidiinta ku caawiyaa in ay fahmaan qaabka ay maxkamadu u shaqayso wuxuuna siiyaa foomamka loo baahanyahay in laga bedelo tirada lacagta amarka maxkamada. Fududeeyayaasha maxkamada waxay qaataan lacag mana bixiayaan tallo sharciyeed ama ma siiyaan matalaad sharciyeed. Foomamka waxaa laga helayaa boggaan internetka ah www.courts.wa.gov/forms/

Arinta wanaagsan ee bedelaada amarkaaga maxkamadu aad adigu naftaad samaysid ama ayada oo la adeegsanayo qareen waxay tahay:

- Waxay noqonaysaa mid dhakhso ah
- Qaaliga Maxkamada Sare ayaa dhagaysanaya kiiskaaga xitaa haddii aan u qalmin hawsha Qaybta Taakulaynta Ilmaha.

## Marka uu Dejiyo ama Qoro Amarka Maamulka Washington taakulaynta ilmaha

Waalidka ayaa weydiin kara Qaybta Taakulaynta Ilmaha in ay bedelaad ku sameyso amarka ayada oo aan ka codsan muraajaco. Haddii uu dakhligaagu isbedelay tan iyo intii Qaybta Taakulaynta Ilmaha ay gelisay amarka maamulka, waxaad codsan kartaa maamul dhagaysi.

### Anigu kuma haysto kiis Qaybta Taakulaynta Ilmaha, maxaan sameeyaa?

Haddii aad tahay waalidka bixiya ama waalidka qaata taakulaynta ilmaha oona doonaysid in ay Qaybta Taakulaynta Ilmaha muraajaco ku samayso amarkaaga, waxaad codsan kartaa adeego fullin buuxda ah waxaadna codsan kartaa muraajaco loogu talogalay bedelid.